Hadafkeena

Waxaan rumeysanahay in caruurtoo dhan ay leeyihiin ubaahnaasho gaar-ahaaneed ay helaan koritaan jirro iyo dhaawac la'aan ah. Anakoo la kaashaneyna jaaliyadda iyo war aruurinta, Waan ka-hortigidoonaa, daaweyn-doonnaa isla markaasna cirib-tiri doonnaa cudurada caruurta ku dhaca.

Adeegga Tarjumaad Bilaashka ah

- Isbitaalka dhexdiisamarkaad tagtid, weydii inaad la kulantid kal-kaaliyaha cunuggaada.
- Isbitaalka debediisa, waxaad wacdaa lambarka khadka freega ah ee tarjumaada qoyska 1-866-583-1527. Usheeg tarjumaha magacaaga ama mudada aad u baahantahay.
- dhagoole-yaasha ama maqalku ku adagyahay waa iney wacaan: 206-987-2280 (TTY)

Isbitaalka Caruurta ee Seattle wuxuu siiyaaa gargaar caafimaad ubaahnaashada gaar-ahaaneed ee caruurta iyaga oo aan ukala soocin jinsi, asal ama xaalada caafimaad uu caruurtu ku sogantahay. Gargaarka dhaqaale ee daaweynta waxay ku xirantahay daqliga qoyska soo gala iyo awooda isbitaalka waxaana loo fidiyaa Ilmaha da'doodu ka yartahay 21 sano oo deggan Washington, Alaska, Montana ama Idaho.

Isbitaalka Caruurta ee Seattle wuxuu adeeg tarjumaadeed ufidiyaa dhagoole-yaasha, dadka maqalku ku dhibyahay ama aan af Ingiriiska ku hadlin iyo xubnaha qoysaska, isla markaana wuxuu kaloo diyaar ula yahay inuu wakiil uga noqdo qoyska arrimaha xagga sharciga la xariira ee bilaash ah. Isbitaalka Caruurta ee Seattle wuxuu diyaar la yahay macluumaadkan inuu idinku siiyo qaabab kale markii aad soo codsatiin. Wixii faahfaahina wac Rugta Qoyska: 206-987-2201.

Seattle Children's
HOSPITAL • RESEARCH • FOUNDATION

4800 Sand Point Way NE
PO Box 5371
Seattle, WA 98145-5005

206-987-2000
1-866-987-2000 (Tel lacag la'aan ee wixii ganacsi ku saabsan oo keliya)
1-866-583-1527 (Khadka Tarjumaadda Qoyska)

www.seattlechildrens.org

© 2009-2011 Seattle Children's, Seattle, Washington.
All rights reserved.

Rights and Responsibilities-Somali
PI090
Rev. 1/11

Xuquuqda iyo Mas'uulidda

ee Bukaan-Socodka iyo Qoysaska

Seattle Children's
HOSPITAL · RESEARCH · FOUNDATION

Xuquuqda iyo Mas'uulidda ee Bukaan-Socodka iyo Qoysaska

Isbitaalka Caruurta ee Seatlle wuxuu ballan qaadayaa inuu bixiyo daryeel heer sare ah eek u saleysaqn baahida qoyska. Bukaan-socodka iyo qoysaska dhamaan waxay ka mid yihiin kooxda gargaarka. Qoraalkan wuxuu kuu sharaxayaa waxa adiga iyo qoyskaadaba aad ka filankartaan adinkoo ka mid ah kooxda daryeelkaq. Weliba waxay fursan kuu siineysaa inaad ka bixisid faallo iyo wixii kalo aad ka walaacsan tahay.

Si aan kuu tusno xushmo waxan sameyn doonnaa:

- Waxaan kuu sheegeynaa magaceenna islamarkaasna kuu sharaxeynaa dowrkeena ku saabsan daryeelka caruurtaada.
- Waxaan kuu fidineynaa daryeel wanaagsan kaasoo dhowra dhaqaqnkaada, noloshaada ijtimaaciga ah, iyo middaada diineedba.
- Inaan sharafno noloshiina shaqsiyeed ee adiga iyo caruurtaada.
- Kuu xafidno diiwanka daaweynta caruurtaada, iyo wada-hadalada ku saabsan daryeel-kooda oo iyo macluumaadka qoyska.
- In aan qabano wax kasta oo suurto-gal ah si aan u qafiifino xanuunka caruurtaada annakoo isticmaaleyna dawooyin iyo habab kale ee ku sabsan ka khafiinta xanuunka.*
- Inaan siino daryeel amaankiisu suganyahay, kuna yaal meel ammaan ah, kana fogeyneysa wixii macamil-xumo ah una fududeyneysa adeeg dhawsan.*
- In laga ilaaliyo caruurtaada dhibka iyo kelinimada marka ay lagama-maarmaan noqoto mooyee ama sharcigu ogolaado.

Si aan u daryeelno caruurtaada iyo qoyskaba waxaan sameyn doonnaa:

- Haddii aad rabtid inaad la joogto canuggada badanaa inta daaweyntu u socoto.
- Waxaan u ogolnahay hal qof oo qoyska ka mid ah inuu hameenkii lajoogo cunuggada.
- Haddii aan rabtid, waxan kula kulan-siineynaa qoysas kale oo dhacdooyinka at lasoo kulmeen iyo taadu isla mid tahay.
- Waxaan idiin keeni karnaa qof diintiinna yaqaan.*
- Waxaan kuu sharaxeynaa sidaad noo sii-laheed faallo, aqma aan is weydaaran laqheyd wixii walaac ah oo jira, ama dacwad u qoran lehayd.
- In dib loo eego si dhaqsi ah waxii aad ka walaac santahay, aana xallinno markii aan awood u helno.

Taleefanada Muhiimka ah:

Lambarka ra'iisga ee Isbitaalka	206-987-2000 (Codka) 206-987-2280 (TTY)
Fatuuradaha	
Fatuurada Isbitaalka iyo	206-987-5770 (Xasaabaha Bukaan-Socodka)
Musaacadada Dhaqaalaha	866-987-5770 (Toll-free) 206-987-5786 (Luqada Isbaanishka)
Fatuuradaha Dhaqtarka	206-987-8455 (Kooxda Daawada ee Isbitaalka Caruurta) 888-675-2864 (Toll-free)
Dandarada iyo Tix-gelin la'aanta Caruurta	206-987-2194
Faallo ama muhimad	206-987-2550 (Xiriirka Qoyska iyo bukaan-socodka)
Khadamaad Dhaqameedka	206-987-3676
Khadamaadka Dhagoolayaasha/	206-987-5010 (Codka)
Iyo dadka maqalku dhibaayo	206-987-2280 (TTY)
Dadka dhiman	206-987-2260
Xuquuqda Sinaanta ama latashiga	206-987-2000 (Wedii Sentraalka Xuquuqda Sinaanta)
Macluumaadka Caafimaadka	206-987-2201 (Rugta Qoyska) 206-987-2098 (Maktaba iyo Macluumaadka)
Arkiibiyaha Daawada	206-987-2173
Shaqsi Keliya (Privacy)	206-987-1200 privacy.questions@seattlechildrens.org
Khadamaad Diineed	206-987-2000 (Sentraalka weydii Masaajidka)
Ku saabsan Amaanka	206-987-2030
Shaqada Mujtamaca	206-987-2167

- Itijaah Horumarsan
- Dhiira-gelin
- Kooxaha Tageerka

- Kawac bukaan-socodka iyo xiriirka qoyska lambarka 206-987-2550 ama 1-866-987-2000 (toll-free). Ama, hadaad rabto inaad lahadasho qof Af-Somaali yaqaan, wac lambarka tarjumaada qoyska oo ah 1-866-583-1527 weydiina tarjumaha inuu kugu xiro qadka 206-987-2550.
- Ama gal barta Internedka www.seattlechildrens.org/familyfeedback.
- Hadaad rabtid ku soodir fariinta elektarinigaa (e-mail): family.feedback@seattlechildrens.org.
- Hadaad rabtid inaad warbixin ka dhiibtid buuxi xaashida faalada oo aad ka heli kartid irida laga soo galo una dhiib qof shaqaalaha ka mid ah.
- Nagala soo xiriir Cinwaankan:

  Seattle Children's Hospital
  Patient and Family Relations
  P.O. Box 5371, T-5112
  Seattle, WA 98145-5005

Hadii aad soo wacdid ama warqad dacwo ah usoo qortid Xirrrirka Bukaan-socodka iyo qoysaska (Patient and Family Relations), todobo (7) maalmood gudohood ayaan kugu soo wargelineynaa inaan helnay arrintii aad ka cabaneysey. Hadii waqti dheeraad ah loo baahdo si loo sii falanqeeyo arrinta, waxaan kusiin donnaa qiyaasta maalinta ugu dambeyn aan kuusoo jawaabi doona.

Waxaad toos ashatakadaada ugu diri karta Waaxda Caafimaadka ee Washington sida hoos ku qoran:

- Kawac Telefan lambarka: 1-800-633-6828 ama 360-236-4700
- Hadaad xashi uqoreysid ugu dir cinwaankan:

  HSQA Complaint Intake
  P.O. Box 47857
  Olympia, WA 98504-7857

- Ama fariinta elektaroonigaa: HSQAComplaintIntake@doh.wa.gov

Hadii aan xalin weyno arrintaada, waxaad laxariiri kartaa Giddiga Isku-dhafka, xafiiska Ilaalinta Qeymeynta adigoo ku sajilaya ashtakadaada wac:

- Telefan Lambarka: 1-800-994-6610
- Bariidka Elektaroniga: complaint@jointcommission.org
- Barta Internedka: www.jointcommission.org

- Waxaan soo dhoweyneynaa siyaarta-yaasha aad adigu doorato iney kusoo raacaan. Kuwasoo ka mid noqon kara ninkaaga ama naagtaada, qofka aad isla nooshihiin (ayna ku jiraan qof aad isku jinsi tihiin ood isla noshihiin), qof qoyska ka mida ama saxiib. Markaad rabto waad diidi kartaa in qof kusoo raaco oo keligaa waad imaan kartaa.

Si aan maclumaadka kuugu waadixino waxa sameyn donaa:

- Waxaad ka qeyb-qaadan dontaa qorshaha daryeelka ee caruurtaada isla markaasna kuu sharaxeynaa natiijada daaweynta si aad u fahmi kartid.
- Waxaan kuu diyaarineynaa mutarjimiin utarjuma dadka dhagoole-yaasha ah iyo kuwa wax maqalku ku dhib-yahay ama bukaan-socodka aan af Ingiriiska aqoon, xubnaha qoyska iyo wakiil sharci yaqaan adoon wax lacaga lagaa qaadin amaba si bilaasha. Maclumaadka waxaan kuugu diyaarin karnaa qoraallo kala duwan hadii aad codsato.
- Inaad la xiriirtid dhakhtarka cunuggaada ee siiya daryeelka aasaasiga ah. Waxaana kamid ah inaan wargelino dhakhtarka cunuggaada siiya Daryeel Aasaasiga ood la la xiriirto marka cunuggaada isbitaalka la jiifiyo sida ugu dhaqsi badan iyo wixii isbedel ah ee daaweynta ku saabsan.
- Inaan ku barno daryeelka cunuggaadu ubaahan-doono marka guriga la geeyo ama meel kale loo bedelo.
- Inaan kaala hadalno dadka kaa saacidi kara ubaahnaashada Daryeelka Caafimaad ee caruurtaada ee jaaliyaddinna ka midka ah iyo meelaha ay kala joogaan.
- Hadii aad u baahato in lagu siiyo diiwaanka caafimaad ee caruurtaada si dib loogu eego kuuna sharaxno sidii aad u dalban lahayd.
- Inaan ku siino xafididda xogta cafimaadee bukaanka (Notice of Privacy Practices), kasoo sharaxaaya sida aan u isticmaalni macluumaadka bukaan-socodka iyo xaqa aad u leedahay waxkasta oo ku saabsan maclumaadka caafimaadka ee caruurtaada.*
- Inaan koobbi kaa siino qaansheegta Isbitaalka kaasoo ka jawaaba badanaa su'aalaha badanaa la'isweyddiyo ee kusaabsan qaansheegta isbitaalka.
- Inaan kuu sharaxno sidaad u dalban lahayd musaacado maaliyadeed ee caruurtaada xataa hadaad Caymis kujirtid.*
- Bukaan-socodka da'doodu tahay 18 jir iyo wixii kaweyn, waxaan kusiin doonaa macluumaad qoran ku saabsan tilmaamo muhiima marka isbitaalka lagu jiifiyo.*

Waxaad leedahay kala doorasho ku saabsan daryeelka caruurtaada. Waxaad yeeli kartaa:

- Wxaad heli karta maclumaadka kusaabsan kala doorashada daaweynta iyo khatartooda markaas waad dooran kartaa daryeelka aad rabto, xitaa waad diiri karta daawada hadii sharcigu ogolyahay.

- Waxaad dooran kartaa inaad gacan ka geysato daryeelka caruurtaada, daweynta iyo khidmada marki ay amaan tahnay inaad gacn ka geysato.
- Waxaad dalban kartaa kal-kaaliye daawada inuu kula joogo marka baariska jirka lagugu sameynayo iyo barista nidaamka xasaasigaa.
- Waxaad dooran ama diidi kartaa inaad ka qeyb qaadato mashruuca cilmi baarista laguu soo jeediyo. Go'aankaagu waxba udhibi madoono qeymaha daryeelka aan u fidino caruurtaada.
- Waxaad codsan kartaa in lagaa bedelo hay'ada kusiisa daryeelka aasasigaa.
- Waxxad codsan kartaa lataliye mooraal ahaan kaa caawina markaad isku buuqdid ama dhib kaa qabsado arrimo kusaabsan daryeelka.*

Waalideenta iyo Xubnaha Qoyska: Mas'uuliyaddda aad la wadaagtiin daryeelka bukaan-socodka:

- Inaad la wadaagtid macluumaadka saxa ah, isla markaasna dhameys-tiranna eek u saabsan caruurtaada cafimaad-kooda iyo tariikhda daweynta.
- Su'aalo ayaad weydiin karta, kana qeyb-qaadan kartaa qorshaha ku saabsan daryeelka caruurtaada.
- Durbadiiba noosoo sheeg hadey jiraan wax kusaabsan nabad-gelyada caruurtaada ama aad dareento daryeelkoodu inuu khatar ku sugan-yahay.
- Inaan ka wada hadalno kala doorashada xanuun joojiyaha iyo inaad gacan ka geysato qorshaha xanuun joojiyaha lagu siinayo caruurtaada.
- Inaad barato caruurtaadu daryeelka cafimaad ay u bahanyihiin. Inaad raacdo qorshaha caruurtaadu daawada ku qaadayaan markey kuriga joogaan ama noosoo sheeg hadii aadan awoodin inaad qorshahaas.
- Inaad ilaaliso waqtiga ballamada ama aad noo sheegtid hadii aadan imaan.
- Inaad ixtiraamto nolol shaqsiyeedka gaar-ahaaneed iyo xuquuqda caruuraha kale, qoysaska iyo shaqaalaha Isbitaalka.
- Inaad ilaaliyo shuruucda caruurta, ay ka mis yihiin dadka soo siyaarta, sigaarka, daroogada sharci la'aanta ah iyo hubka.
- Ilaali raacna shuruucda Caymiska Caafimaadka marka lagu soo wareejiyo si loo bixiyo fatuuradaha isbitaalka.

* Macluumaad kusaabsan arrintan waxaad kaheli kartaa Rugta Qouska oo ku (dabaqa 5aad, Train zone). Qaar kamida waxaa ka heli karta barta internedka: www.seattlechildrens.org.

Bukaan-socod: Bukaan-socodka Isbitaalka Caruurta, waxaad filan kartaa:

- In magacaaga laguugu yeero.
- Mucaamalo saxiibti-nimo, shaqaale daryeelkoodu lasocdo ixtiraam, kuna dhegeysta, qeymeeyana ra'yigaaga kala doorasha-daada.
- In si dhaqsi ah laguu daweeyo, laguna dareen-siiyo inaad meel naban iyo raaxo leh joogto.
- In lagu siiyo daawo ama nidaamyo kale oo xanuunka kaa joojiya, hadii loo bahdo.
- In xogtaada shakhsi la dhowro marka baaritaan caafimaad lagugu sameynaayo, marka lagu daaweynayo ama lagula kulmaayo.
- Maclumaadka ku saabsan jiradaada iyo su'aalaha caafimaad-kaaga qofna looma gudbin doono.
- Inaad ka qeyb-qaadato go'aanada daryeelkaada islamarkaasna ay si run ah shaqaaluhu uga jawaabi doonaan su'aalahaaga.
- Inaad keensa kartid xubno kamida qoyskaaga ama qaraabadaada si ay kuu tageeraan kaagana war hayaan markey awoodaan nabadna ku jirto.
- Inaad xuquuqda siyaarada taageertid. Waxaa laga yaabaa inaan joojino ama yareyno dadka kusoo siyaaranaya. Si kastaba ha ahaatee ma joojineyno mana yareyneyno siyaarta-yaasha marka loo fiiriyo midabka, diinta, jinsiga, asalka ay kasoo jeedaan ama inay dhimanyihiin.
- Waxaan kuu diyaarineynaa turjumaanada ama aalad ku saacida hadaad u baahato.
- Waqti yeelo aad ku nasatid, ku seexatid, wax kubaratid kuna cayaartid.
- Inaad baratid waxaad u baahantahay inaad ogaatid, gurigana aad ku sameysid.

Adigoo ah bukaan-socodka Isbitaalka Caruurta, mas'uuliyadaaadu waxay tahay inaad si asluub wanaagsan leh ula dhaqantid bukaan-socodka kale, qoysaska iyo shaqaalaha isla markaasna ilaalisaa qawaniinta amaanka ee Isbitaalka.

Faalada ama wixii ku khuseeya

Waxaan rabna inaan kuu fidino daryeelka ugu wanaagsan adiga iyo qoyskaaga. Tusaalooyinka aad soo jeediso waxay naga caawineysaa inaan kor u qaadno khadamaad-keena. Sida hoos kuqoran ayaad noogu soo gudbin kartaa faallooyinkaaga iyo tusalooyin-kaba:

- Lahadal kalkaaliyaha cunuggaada. Hadii kalkaaliyuhu uusan ku caawini karin, weydii inaad lahadasho madaxa kal-kaaliye-yaasha ama manajarka xaafada.